Xafiiska Xuquuqda Rayadka (OCR) wuxuu meel-mariyaa sharciyo badan oo mamnuucaya in takoorid laga dhex sameeyo barnaamijyada ama hawlaha ka hela maaliyad federalda Waaxda Waxbarashada (ED). Takooridda qolada, midabka iyo dalka laga soo jeedo ku salaysan waxaa mamnuucaya ciwaanka VI ee Xuquuqda Rayadka ee 1964; takooridda jinsiga ku salaysanna waxaa mamnuucaya ciwaanka IX ee dib-u-habaynta Wax barashada ee 1972; takooridda laxaad la'aanta ku-salaysan waxaa mamnuucaya qaybta 504 ee sharciga baxnaanaynta ee 1973 iyo ciwaanka II ee Dadka Maraykanka ee laxaadka la' ee 1990 (Ciwaanka II ayaa mamnuucaya takooridda ka iman karta qaybaha adeegga shacabka, haddii ay qaybahaasi yihiin kuwo kaalmada maaliyadeed ee federaalka hela ama aan helinba); waxaa takooridda da'da ku-salaysan mamnuucaya sharciga soo baxay 1975.

Shuruucyadaan xuquuqaha rayadka oo ay hirgeliyso (OCR) waxay gaadhsiisanyihiin dhammaan wakaaladaha waxbarashada ee gobolada, dugsiyada hoose, iyo kuwa sare, kulliyadaha iyo jaamicadaha, dugsiyada farsamooyinka, dugsiyada proprioetary-ga, wakaaladaha gobolada ee baxnaanaynta farsamada, goobaha akhriska iyo goobaha kaydka qalabyada taariikhiga ah, ee waaxda waxbarashada ka hela kaalmada maaliyadeed ee Federaalka. Barnaamijyada ama hawlaha oo hela kaalmada lacageed ee ED, waa in gargaarka, faa'iidooyinka ama adeegyada si aan eexasho lahayn oo siman uu bixiyaan , Faa'iidooyinkan ama adeegyadan waxaa ka mid noqon kara, balse, ayna ku koobnayn gelitaanka, xulidda, barnaamijyada waxbarashada, dawaynta iyo adeegyada ardayda la siinayo, talo-siinta iyo adeegyada ardayda la siinayo, talo-siinta iyo tilmaamidda, hawlaha fasalka, bixinta dhibcaha, waxbrashada farsamooyinka, raaxaysiga, jimicsiga jidhka, atleetiigsiga, guriyeynta iyo shaqaalaynta.

Waxaa kale oo intaa dheer, marka laga bilaabo January 8, 2002, in (OCR) dhaqan-gelinayso sharciga helitaanka siminaanta caruuraha "Boys Scouts" oo qeyb ka mid ah sharciga yaan ilmaha caruurta dib looga tegin ee sanaadkii 2001. Sharciga "Boy Scouts of America Equal Access" wuxuu dhigayaa in dugsiyada hoose ee dadweynaha, dugsiyada sare ee dadweynaha, ama wakaaladaha gobolka ama dagaanka ee waxbarashada qaabilsan ay xilliyada xiisadaha waxbarashada, xilliyada ka-horeeya iyo xilliyada ka dambeeyaba ay adeeg siman oo aan u kala eexasho lahayn oo caddaalad ku dhisan ay siiyaan sida uu dhigayo ciwaanka 36 ee xeerka bulshada ee Maraykanaka.



## Maxaa la Samayn

Qof-kasta oo doonaya in uu (OCR)-ta cabasho rasmi ah u soo gudbiyo waa in cabashadiisa takooridda qoraal ugu soo gudbiyo xafiisyada dhaqan-gelinta (eeg liiska) adiga oo adeegsanaya foomamka cabashada lagu buuxiyo, waxaad ku qoraysaa arrimahan soo socda:

- Magacaaga iyo ciwaankaaga (waxaa waxtar leh lambarka taleefonka lagaa heli karo waqtiga meheradda, laakiin kuma qasbanid);
- Tilmaanta guud ee qofka (dadka) la sheegay in waxyeelo takoorid ay soo gaadhay (looma baahna magaca ama magacyada qofkaa ama dadkaa);
- Magaca machadka la sheegay in uu takooridda gaystay iyo meesha uu ku yaalo iyo
- Si waxa dhacay ay (OCR) u fahanto waxaa loo baahan yahay in arrinta dhacday ama arrimaha dhacay ee takooridda si faah-faahsan oo qeexan loogu soo gudbiyo. Waxaa kale oo loo baahanyahay in waxa takooriddaa sababta u ah (Sida qolada, midabka, dalka laga socdo, jinsiga, laxaad - la'aanta, da'da ama wixii la mid ah) la soo raaciyo.



## SIDA LOO SOO GUDBINAYO CABASHADA EE KHADKA

(OCR) waxay ardayda, waalidiinta, wakiilada machadyada waxbarashada iyo macaamiisha kale ee (OCR) ay ku dhiiri-gelineysa in ay isticmaalaan e-mail-ka ama faaksiga si ay (OCR)-ta ula xidhiidhaan markasta oo ay sidaas surta-gel tahay. Waxaa kale oo ay dadka cabanaya ay cabashadooda (OCR)-ta u soo marin karaan khadka website-ga ee ah:

http://www.ed.gov/ocr/complaintprocess.html.

Kuwa aan haysan khadka e-mailka ama aan internet-ka heli karayn waxay bilaa lacag ay adeeggaas uga heli karaan goobaha akhriska ee dadweynaha ee ugu dhow, meelo badanna waxay ka heli karaan khadadka e-mailka.

Cidda laga cabanayo ma qaadi karaan talaabo aargoosi ah qofkii cabasha ka soo jeediyay, qofka ku caddeeyay ama baadhitaanka ama geeddi socodka sharciyeed ka qayb-qaatay sida sharciyada kor ku qeexan ay muujinayaan.



# SIDA XAFIISKA XUQUUQDA RAYADKA LOOGU GUDBINAYO CABASHADA

Xafiiska Xuquuqda Rayadka
Waaxda Waxbarashada ee U.S.
400 Maryland Avenue, S.W.
Washington, D.C. 20202-1100
(202) 245-6800; 1-800-421-3481
FAX: (202) 245-6840 TDD: (877) 521-2172
E-mail: OCR@ed.gov
Web: http://www.ed.gov/ocr

# YAA XEREYN KARA

Qofkasta oo rumaysan in machadyada waxbarashada ee caawimaadda maaliyadeed ka hela federaalka ay ku sameeyeen takoorid ku-salaysan qolo, midab, dalka laga soo jeedo, jinsiga, laxaad-la'aanta ama da'da ama qofka rumaysa in dugsiyada hoose ee dadwaynaha, ama dugsiyada sare ee dadwaynaha ay ku xad-gudbeen sharciga "Boy Scouts of America Equal Access" ayaa cabashada xereyn kara. Qofka ama hay'adda cabashada soo gudbinaysa ma'aha qasab in uu noqdo qofka ama kooxda dhibka loo gaystay, balse, wuxuu noqon karaa qofkale oo ku xereynaya magaca cidda dhibku soo gaadhay.

# WAQTIGA OO LA ILAALIYO

Waa in cabashada lagu soo gudbiyo 180 maalmood gudahood kaddib markay takooriddu dhacdo, haddii ayna jirin sabab kale oo caqli-gal ah oo ay (OCR) waqtigaas ku dheeraynayso.

# HANNAAN GUDBINTA CABASHADA MACHADKA

Ka-hor inta aan cabashada (OCR)-ta loo soo gudbin, waa in qofku uu hannaanka gudbinta cabashooyinka ee machadka uu soo maro si cabashada loo xalliyo. Qofka cabanaya sharciyan kuma qasbana in uu hannaanka dhagaysiga cabashooyinka ee machadkiisa uu soo maro ka-hor intuusan (OCR)-ta u soo gudbin. Qofku haddii uu doonayo in uu cabashadiisa labadaba meeloodba mariyo waxaa qasab ah in uu cabashadiisa (OCR)-ta soo gaadhsiiyo 60 maalmood gudahaood kaddib marka ay qeybta dhagaysiga cabashooyinka ee machadku ay talaabadeeda ugu dambaysa qaddo.



# MEESHA LOO QORAYO

## QAYBTA BARI

**Connecticut, Maine, Massachusetts, New Hampshire, Rhode Island, Vermont**
Xafiiska Xuquuda Rayadka, Xafiiska Boston
Waaxda Wabarashada ee U.S
33 Arch Street, Suite 900
Boston, MA 02110
Tel.: (617) 289-0111; Fax: (617) 289-0150

**New Jersey, New York, Puerto Rico, Virgin Islands**
Xafiiska Xuquuda Rayadka, Xafiiska New York
Waaxda Wabarashada ee U.S
32 Old Slip
26th Floor
New York, NY 10005
Tel.: (646) 428-3900; Fax: (646) 428-3890

**Delaware, Maryland, Kentucky, Pennsylvania, West Virginia**
Xafiiska Xuquuda Rayadka, Xafiiska Philadelphia
Waaxda Wabarashada ee U.S
The Wanamaker Building
100 Penn Square East, Suite 515
Philadelphia, PA 19107
Tel.: (215) 656-8541; Fax: (215) 656-8605

## WAXDAA KOONFUREED

**Alabama, Florida, Georgia, Tennessee**
Xafiiska Xuquuda Rayadka, Xafiiska Atlanta
Waaxda Wabarashada ee U.S
61 Forsyth Street S.W., Suite 19T70
Atlanta, GA 30303
Tel.:(404) 562-6350; Fax:( 404) 562-6455



**Arkansas, Louisiana, Mississippi, Texas**
Xafiiska Xuquuda Rayadka, Xafiiska Dallas
Waaxda Wabarashada ee U.S
1999 Bryan Street, Suite 1620
Dallas, TX 75201
Tel.:(214) 661-9600; Fax: (214) 661-9587

**North Carolina, Virginia, Washington, D.C., South Carolina**
Xafiiska Xuquuda Rayadka, Xafiiska DC
Waaxda Wabarashada ee U.S
P.O. Box 14620
Washington, D.C. 20044
Tel.:(202) 208-2545; Fax: (202) 208-7797

[redacted]

**Illinois, Indiana, Minnesota, Wisconsin, Iowa, North Dakota**
Xafiiska Xuquuda Rayadka, Xafiiska Chicago
Waaxda Wabarashada ee U.S
111 North Canal Street, Suite 1053
Chicago, IL 60606
Tel.:(312) 886-8434; Fax: (312) 353-4888

**Michigan, Ohio**
Xafiiska Xuquuda Rayadka, Xafiiska Cleveland
Waaxda Wabarashada ee U.S
1350 Euclid Avenue, Suite 325
Cleveland, OH 44115
Tel.: (216) 522-4970; Fax: (216) 522-2573



**Kansas, Missouri, Nebraska, South Dakota, Oklahoma**
Office for Civil Rights, Kansas City Office
U.S. Department of Education
One Petticoat Lane
1010 Walnut Street, Suite 320, 3rd Floor
Kansas City, MO 64106
Tel.:(816) 268-0550; Fax: (816) 823-1404

[redacted]

**Arizona, Colorado, New Mexico, Utah, Wyoming**
Xafiiska Xuquuda Rayadka, Xafiiska Denver
Waaxda Wabarashada ee U.S
111244 Speer Boulevard
Federal Building, Suite 310
Denver, CO 80204
Tel.:(303) 844-5695; Fax: (303) 844-4303

**California**
Xafiiska Xuquuda Rayadka, Xafiiska Francisco
Waaxda Wabarashada ee U.S
50 United Nations Plaza
San Francisco, CA 94102
Tel.:(415) 556-4275; Fax: (415) 437-7783

**Alaska, Hawaii, Idaho, Nevada, Oregon, Washington, Montana, American Samoa, Guam, and the Northern Mariana Islands**
Xafiiska Xuquuda Rayadka, Xafiiska Seattle
Waaxda Wabarashada ee U.S
915 Second Avenue, Room 3310
Seattle, WA 98174
Tel.:(206) 220-7900; Fax: (206) 220-7887

Waxaa la naqtiimay September 2005